Qiimaynta Baaxadda leh ee Minnesota–Taxaneyaasha III

Akhriska

Muujiyayaasha Heerka Kasbasho

Juun 2013

Minnesota Department of Education

Tusmada Buuga

Muujiyayaasha Heerka Kasbashada ee Akhriska MCA-III, MCA-ga la Geddiyey iyo MTAS 2
Hagaha Fahamka Muujiyaha Heerka Kasbashada Akhriska MCA-III 8
FASALKA 3 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III.....10
FASALKA 4 - MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III.....14
FASALKA 5 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III.....18
FASALKA 6 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III.....22
FASALKA 7 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III.....26
FASALKA 8 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III.....30
FASALKA 10 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III.....35

Muujiyayaasha Heerka Kasbashada ee Akhriska MCA-III, MCA-ga la Geddiyey iyo MTAS

Guudmar

Minnesota waxay soosaartay *Istaandaradeeda Tacliineed ee K-12 Minnesota-Farshaxanada Luuqadda Ingiriisida* ee 2010 oo dib loo eegay. Dib u eegistan istaandarada, Minnesota waxay ku kabtay istaandarada farshaxanada luuqadda Ingiriisida ee Midaysan, kuwaasi oo gabi ahaantood la qaatay. Qiimaynta hawlgaleed ee u horraysa oo kusalaysan qaybta akhriska ee istaandarada dib loo eegay waxa la qaaday gu'gii 2013.

IstaandaradaTacliineed ee K-12 Minnesota-Farshaxanada Luuqadda Ingiriisida ee 2010 waxay u taagan yihiin filashooyin waawayn ee fahamka akhriska oo ka sarreeya wixii la filayey istaandarada tacliineed ee 2003. Filashooyinkan hawlgal ayaa laga dhigay nashqadda imtixaanka iyo qiimaynaha iyadoo la kordhiyey kakanaanta iyo saxsanaanta curisyada ahriska iyo ashyaada imtixaanka. Hadafka uu leeyahay istaanadarada dib loo eegay iyo qiimayntu waa in la hubiyo in ardaydu muujiyaan diyaar u ahaansho kolaj iyo shaqo.

Qiimaynaha Akhriska Minnesota

Muujiyayaasha Heerka Kasbasho (ALDs) dokumentigan waxa loo qoray saddex qiimayn akhris oo la qaado kaqayb ahaan nidaamka qiimaynta Minnesota. Nashqadda imtixaanka iyo ALDs dhammaan qiimaynaha akhriska Minnesota waxay ku qotomaan qaybta akhriska *IstaandaradaTacliineed ee K-12 Minnesota-Farshaxanada Luuqadda Ingiriisida.* ALDs saddexda imtixaan waxay sharxayaan filashooyinka waxqabad ee aadka u kala duwan marka la eego dadka galaya imtixaanka, waxa lagu qiimaynayo imtixaanka iyo sida loo qiimaynayo.

Qiimaynaha Baaxadda leh ee Minnesota-Taxanayaasha III (MCA)

Akhriska MCA waxa laga qaadaa ardayda caadiga ah. Ugu dhawaan xaddi yar oo ah ardayda fasalada 3-8aad iyo 10aad ayaa qaata Akhriska MCA. Ardayda badankooda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah waxay qaataan imtixaankan isagoo ah qiimayntooda akhriska ujeedooyin la xisaabtan.

Qiimaynaha Baaxadda leh ee Minnesota –la Geddiyey (MCA-ga la Geddiyey)

Akhriska MCA-ga la Geddiyey waa qiimayn beddel ah oo kusalaysan istaandarada kasbashada oo la geddiyey. Kooxaha Barnaamijka Waxbarasho ee la Khaasyeelay (IEP) ayaa u doori kara qiimayntan ardayda leh naafo ka hor istaagaysa inay kasoo dhalaalaan ku fiicnaashaha MCA. MCA-ga la Geddiyey wuxuu kusalaysan yahay nashqad imtixaan oo la mid ah MCA, laakiin adkaanshaha iyo dhererka imtixaanka hoos loo dhigay. Waaxda Waxbarashada Maraykanku waxay ka joojinaysaa taageerada qiimayntan, qaadisteeda u dambaysa ee Minnesota-na wuxuu ku ekaan doona gu'ga 2014.

Imtixaanka Minnesota ee Xirfadaha Tacliineed (MTAS)

Akhriska MTAS waa qiimayn kare oo kusalaysan istaandaro kasbasho oo kale. Kooxaha IEP ayey dhici kartaa inay u dooraan qiimayntan ardayda leh naafada garasho ee ugu daran. nashqadda imtixaanka Akhriska MTAS waxay kusalaysan yihiin iyadoo hoos loo dhigay tirada istaandarada heerka fasalka laga qaado MCA iyo MCA-ga la Geddiyey. Istaanadaradan la doortay waxa hoos loo dhigay qotoda, ballaca iyo kakanaanta.

Istaandarada Kasbashada

Kadib qaadiska koowaad ee qiimaynta cusub, Waaxda Waxbarashada Minnesota waa inay iskugu yeedhaa/kulmisaa khabiirada meesha tusmada iyo daneeyayaasha si ay ugu go'aamiyaan, hab dejineed istaandar, heerarka waxqabadka loo tabinayo ardayda, waalidka iyo dugsiga. Guddida dejinta istaandarku waxay dejinayaan buundooyinka go'an ee caddaynaya afarta heer ee kasbasho ee qiimaynaha Minnesota ee gobolka oo dhan. Heerarka kasbasho ee qiimaynta guud, la geddiyey iyo ta beddelka ah waxa lagu muujiyey Shaxanka 1.

Shaxanka 1: Summadaha Heerka Kasbasho

MCA	MCA-ga la Geddiyey	MTAS
Aan Buuxin Istaandarada	Aan Buuxin Istaandarada Kasbasho ee la Geddiyey	Aan Buuxin Istaandarada Kasbasho ee Beddelka ah
Qayb ahaan Buuxiyey Istaandarada	Qayb ahaan Buuxiyey Istaandarada Kasbasho ee la Geddiyey	Qayb ahaan Buuxiyey Istaandarada Kasbasho ee Beddelka ah
Buuxiyey Istaandarada	Buuxiyey Istaandarada Kasbasho ee la Geddiyey	Buuxiyey Istaandarada Kasbasho ee Beddelka ah
Barodhaafiyey Istaanarada	Barodhaafiyey Istaandarada Kasbasho ee la Geddiyey	Barodhaafiyey Istaandarada Kasbasho ee Beddelka ah

Ardayda kasbada heerarka "Buuxin" iyo "Baradhaafin" MCA, MCA-ga la Geddiyey ama MTAS waxa loo tixgaliyaa ku fiican aqoonta, xirfadaha iyo hababka (KSPs) lagu sharxay istaandarada tacliineed.

ALDs-ka qiimaynaha Minnesota ee akhrisku waxay siiyaan sharraxaad waxqabadka ardayga heerka fasalka ee mid kasta oo kamid ah heerarka kasbasho. Qaybta akhriska ee istaandarada tacliineed ee farshaxanada luuqadda Ingiriisida Minnesota waxay iftiimisaa ahdaafta macalimiinta iyo ardaydu ay beegsanayaan inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Qiimaynaha Minnesota waxay cabbiraan gaadhista ardayda ee ahdaaftan, ALDs-kuna wuxuu sharraxaa waxqabadka ardayga heerka fasalka ee heer kasta oo kasbasho oo kusalaysan natiijooyinka qiimaynta. Ardayda fiican qiimaynaha Minnesota waxa loo tixgalinayaa inay qaadeen tubka guusha dugsiga dabadii, filashooyinkan sarena waxa lagu muujinayaa ALDs waxqabadka heerarka kasbasho ee "Buuxiyey" iyo "Baradhaafiyey". Ardyda ah akhriyayaal fiican cabbirkan waxay ku sugan yihiin dariiqo ay kaga baxayaan dugsiga sare iyagoo si fiican ugu diyaarsan koorsooyinka heerka galista iyagoon sii marayn waxbarasho ama tabobar dugsiga sare dabadii. Sida ay dhici karto in lagu sheegay ALDs ee qiimaynaha akhriska Minnesota, u diyaar ahaanshaha dugsiga sare dabadii ee waxbarasho, tabobar ama ku biirista shaqaalaha waxay u taagan tahay filashooyin ka yara duwan ardayga qaadanaya qiimayno beddel ah marka loo eego ardayda qaadanaysa qiimaynaha laga qaado ardayda caadiga ah.

Waxa jira qiyaas waxqabadka ardayga ah oo u taagan heer kasta kasbasho kasta oo lagu sharxay ALDs. Markay qoreen muujiyayaasha fasal kasta iyo heer kasbasho kasta, xubnaha kooxda kobcinta ALD waxay saadaalin arday waxqabadkiisu uu dhaco badhtanka qiyaasta. Si uu u gaadho KSPs kaasi oo ka soocaya waxqabadka ardayga hal heer mid kale, waxa sidoo kale lama-huraan ahayd in maskaxda lagu hayo bar dhammaadka sare iyo hoose ee qiyaasta heer kasbasho dhexdii si si kaafi ah looga garto heerka ku dhinac qabsan.

Muddada habka dejinta istaandarka, khabiirada meesha tusmada—kuwaasi oo badankoodu ay ahaayeen macalimiin—waxay abuureen nooc labaad oo ALDs ah si loogu isticmaalo dejinta sargoynta

buundooyinka. Ka shaqyanta ALDs-ka dokumentigan, dejiyayaasha istaandarku waxay ku sharxeen waxqabadka ardayga “si dirqi ah ku buuxiyey” shuruuda ku darista heer kasbasho. “Si dirqi ah ku buuxiyey-dan,” ama bar dhammaadka, ALDs iyo sargoynta buundooyinka ka dhasha, waxay u taagan yihiin waxqabadka ugu yar ee looga baahan yahay in la buuxiyo filashooyinka heer kasbasho.

Qayb, Qaybhoosaad, Qaybaha Xirfadda iyo Istaandarada

Sida sare ku cad, imtixaanka qiimaynaha akhriska Minnesota qaybta akhriska Istaandarada *Tacliineed ee Minnesota K-12-Farshaxanada Luuqadda Ingiriisida*. Qaybta akhriska waxay ka kooban tahay laba qaybhoosaad: Suugaanta iyo Qoraalka Wargalineed. Qaybhoosaadyada suugaanta iyo/ama qoraalka wargalineed waxa laga tixraacaa mid kasta 10 istaandar. Toddoba kamid ah 10 istaandar waxa lagu qiimeeyaa MCA iyo MCA-ga la Geddiyey. Afar kamid ah 10 istaandar waxa lagu qiimeeyaa MTAS. Saddex istaandar akhris kuwaasi oo ka baxsan qiimaynaha gobolka oo dhan ee Minnesota uma oggolaadaan naftooda in la istaandar gareeyo, imtixaanidda ballaadhan waana inay ku qiimeeyaan macalimintu fasalka dhexdiisa.

10 istaandar ee qaybta Akhriska waxa lagu kooxeeyaa qaybaha xirfadeed. Shaxanka 2 wuxuu muujinayaa sida qaybhoosaadyada, qaybo xirfadeedka iyo istaandarada ay ugu taagan yihiin ALDs.

Shaxanka 2. Qaybo Xirfadeed, istaandarada iyo qaybohoosaadyada kujira qiimaynaha akhriska

Qaybo Xirfadeed iy istaandarada *	Qaybohoosaadyada la qiimeeyey	Qiimaynaha
Aasaaska iyo Tafaasiisha		
Istaandar 1	Suugaanta iyo Qoraalka Wargelineed	MCA, MCA-ga la Geddiyey, MTAS
Istaandar 2	Suugaanta iyo Qoraalka Wargelineed	MCA, MCA-ga la Geddiyey, MTAS
Istaandar 3	Suugaanta iyo Qoraalka Wargelineed	MCA, MCA-ga la Geddiyey, MTAS
Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka		
Istaandar 4	Suugaanta iyo Qoraalka Wargelineed	MCA, MCA-ga la Geddiyey, MTAS
Istaandar 5	Suugaanta iyo Qoraalka Wargelineed	MCA, MCA-ga la Geddiyey
Istaandar 6	Suugaanta iyo Qoraalka Wargelineed	MCA, MCA-ga la Geddiyey
Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha		
Istaandar 7	—	—
Istaandar 8	Suugaanta iyo Qoraalka Wargelineed	MCA, MCA-ga la Geddiyey
Istaandar 9	—	—
Qiyaasta Akhriska iyo Heerka Kakanaanta Qoraalka		
Istaandar 10	—	—

*Istaandar 7, 9 iyo 10 waxay ku lug leeyihiin hawlo baahsan ama mashaariic uu qiimeeyo macalinku markay muddo kasoo wareegtoba. Kuma jiraan qiimaynaha akhriska Minnesota lagumana sheegayo ALDs.

Kobcinta Muujiyayaasha Heerka Kasbasho

Kooxda kobcinta ALD waxa kamid ah shaqaalaha Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE) iyo sidoo kale macalimiinta Minnesota. Kadib kooxdani markay qorto ALDs qabyo ah, qabyooyinka hal fasal waxa loo gudbiyey si ay dib ugu eegaan HumRRO, oo ah urur madaxbannaan. HumRRO waxay ka qabatay shaqo baaxad leh qiimaynta kasbashada iyo muujiyayaasha heerka waxqabadka, iyo sidoo kale waafaqsanaanta waxa imtixaanka kujira tusmada istaandarka. Qabyada ALDs iyo qiimaynta HumRRO waxa markaas loo diyaarin in la horkeeno Guddida La-talinta Farsamo ee Minnesota si ay dib ugu eegaan. Qabyo labaad ee ALDs ayaa kadib loo diyaariyey in lagu kordhiyo talobixino marka ay habboon tahay. Qabyadan labaad ayaa kadib loo isticmaalay habka dejinta istaandarka. Guddida dejinta istaandarku waxay ku talisay inaan lagu samayn wax isbeddel wayn ah ALDs, ALDs-na waxa markaas loo tixgaliyey gabogabo markii Madaxa Sare ee Waxbarashu ansixiyey talobixinaha sargoynta buundada ee guddida dejinta istaandarka.

Shaqaalaha MDE oo kamid ah kooxda kobcinta ALD oo ay kujiraan laba khabiir oo ku takhasusay qiimaynta AKhriska MCA, khabiir qiimaynta Akhriska Beddelka ah, iyo khabiir Istaandarada Akhriska Tacliined. Agaasimaha qiimaynta MDE iyo kormeeraha qiimaynta beddelka ah waxay caawiyeen fududaynta kulamada. Shaqaalaha MDE waxa ku biiray macalin dugsiga sare ka dhiga Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida iyo isu-duwaha akhriska/qorista ee fasalada dugsiga hoose.

Kahor intaanay bilaabin shaqadeeda, kooxda kobcinta ALD waxay dib u eegtay ALDs-ka qabyada ah ee ay soosaartay Kooxda Qiimaynta sida Fiican u Dheelitiran. Kooxdu waxay qaddarisay shaqada Smarter Balanced ay qabatay si ay uga soocdo bardhammaadka waxqabadka mid kasta oo xiga oo ka sarreeya marka lagu daro iyadoo siisay sharraxaado qiyaasta waxqabadka. Kooxda kobcinta ALD waxay sidoo kale xustay danaynta muujiyayaasha siyaasadda Kooxda ee u diyaar ahaanshaha kolajka iyo shaqada ee mid kasta oo kamid ah afarteeda heer kasbasho.

Maadaama ALDs-yadan ay aasaasi u yihiin habka dejinta istaandarka qiimaynaha akhriska, kooxda ALD waxay marka ugu horraysa iskuhallaysay istaandarada tacliineed ee nashqadda imtixaanka Akhriska iyo MCA, MCA-ga la Geddiyey iyo MTAS si ay u abuurto sharraxaadaha. Dhawr su'aalood ayaa muhiim u ahaa habka:

- Siday noqon kakanaanta qiyaasta qoraalku heerka fasalka dhexdiisa iyo fasalada oo dhan?
- Ilaa heerkee ayey ardaydu kasoo dhalaali mid kasta oo kamid ah istaandarada heer kasbasho kasta?
- KSPs-kee ayaa suurogal tahay inay sharraxdo darajaynaha waxqabadka afarta heer iyo KSPs-ka ayna suurogal ahayn?
- Sidee, ayaa marka la eego nashqadda imtixaanka, ay ardaydu u awoodaan inay muujiyaan kasoo dhalaalistooda KSPs?

Iyagoo maskaxda ku haya su'aalahan, soosaarayaasha ALD way hubaan inay abuureen muujiyayaal lagu taageeri karo caddayn nashqadda imtixaanka kujirta iyo waxqabadka ardayga marka la eego qiimaynaha gobolka iyo fasalka. Fahamka sida waxyaalaha imtixaanka kujira u iftiimin karaan fahamka qaybta ah ee curiska akhriska iyo fahamka falanqaynta qoraalka ah inuu muhiim u yahay habka abuurista ALDs. Doorsoomayaasha la maarayn karo waxa kujira imtixaanka waxa kamid ah heerka ku

koobnaanta ama fikradaha ay tahay ardaydu inay dhuuxaan, xaddiga taageero ee sida tooska ah loo siiyey ama loo sii mariyey luuqada si taxadar leh loo soo doortay, iyo waafaqsanaanta cabbiraadaha kakanaanta garasho. Sidoo kale waxa lama-huraan ah inay fahamka sida heerka jidhiidha KSPs u saamayso ilaa heerka lagu sharxi karo qiyaasta heerarka waxqabadka. Waxa suurogal ah inaynu u kala saarno afar heer oo waxqabad KSPs badan, laakiin kuwa kale suurogal ma aha. Tusaale ahaan, KSPs-yada qaar waxaynu ka rajaynaynaa ardaydu inay muujiyaan ka soo dhalaalid heerka “Buuxiyey” KSP-na loo dhex qaadi maayo muujiyaha “Baradhaafiyey”. Marar kale, KSP waxa dhici karta inayna nafteeda amaahin si ay u hesho kala duwanaasho heerarka waxqabad. Xaaladdan, KSP waxa dhici karta inay kaliya ka muuqato heerka “Buuxiyey”, oo ardayduna ay awoodi karaan ama awoodi karin inay sameeyaan.

Malayn muhiim ah ee koboca ALDs-kan Akhriska waa in qoraalku kordho kakanaanta fasalka kan ku xiga. Inkastoo ay jiraan muujiyayaal isku mid ah ama isku dhaw fasalada qaar, waa in la fahmo in qoraalada ardaydu isticmaalyaan si ay u muujiyaan xirfadaha ay sii adkaanayaan.

Kooxda kobcinta ALD waxay diyaarisay qabyo-qoraalka MCA ALDs muddada lix kalfadhi shaqo. Inta lagu jiro kalfadhiyadan, kooxdu waxay inta badan u tixraacaysay istaandarada tacliineed iyo nashqadda imtixaanka, sida sare ku xusan. Kooxdu sidoo kale waxay isku hallaysay luuqadda cabbirka Aqoonta Qotada Dheer ee Webb si loo sharxo kakanaanta garasho iyo iyadoo la eegyo cabbirka Lexile si loo qotomiyo wada xaajoodka kakanaanta qoraaleed. Qodobo badan oo arag ayaa la soo bandhigay kalfadhiyada shaqada, wada xaajoodyaduna waxay ahaayeen toos. Kooxda ALD waxay bilawday shaqo fasal kasta iyagoo ugu horrayn sharxaya waxqabadka “Istaandarada Buuxiyey” ee ardayda wada suugaanta iyo qoraalka wargalineed. Heerka “Buuxiyey” wuxuu ka soocayaa waxqabad ku fiicni waxqabadka qayb ahaan ku fiican ama aan ku fiicnayn. Maadaama qiimaynaha akhriska lagu bartilmaameedsanayo faraqa u dhexeeya ku fiicnaasho iyo ka hooseeya ku fiicnaasho, waxa jira caddaymo badan waxqabadka ardayga si looga soo dheegto heerkan kasbasho. Sidoo kale waxa muhiim ah in la soosaaro sharraxaad sax ah ee heerka “Buuxiyey” maadaama ay muhiim u tahay ujeedooyinka la-xisaabtanka. Kadib sharrixidda “Buuxiyey Istaandarada,” kooxda ALD waxay u jeedsatay “Baradhaafiyey Istaandarada,” oo ay kadib hoos u raacday cabbirka ilaa la gaadhay “Qayb ahaan Buuxiyey” iyo “Aan Buuxin.”

ALDs-ka qabyada ah ee maxsuulka kalfadhiyadan ayaa kadib ay dib u eegeen oo muraajiceeyeen khabiirada qiimaynta akhriska MDE si ay u hubiyaan in ku-talogalyada kooxda iyo sharraxaada si sax ah loogu muujiyey muuiyayaasha. Waxay sidoo kale dib u eegeen isku xidhka muujiyayaasha ee heerarka kasbashada ee fasal iyo sidoo kale isku xidhka mid kasta oo kamid ah afarta heer kasbasho fasalada oo dhan. Si kale haddii loo dhigo, miyey sharraxaadaha waxa ardaydu yaqaanaan qabanna karaan ka kortay “Aan Buuxin Istaandarada” ilaa ay gaadhay “Baradhaafiyey Istaandarada” fasal? Iyo miyey sharraxaadaha waxa ardaydu yaqaanaan qabanna karaan heer sida “Buuxiyey Istaandarada” koreen fasalda oo dhan?

Kadib markii qabyada MCA ALDs ay dhammaystirantay, shaqalaaha qiimaynta beddelka ee MDE waxay u isticmaashay ALDs barbilawga MCA-ga la Geddiyey iyo MTAS ALDs. MCA-ga la Geddiyey wuxuu waafaqsan yahay istaandarada tacliineed ee MCA; xeerarka MCA-ga la Geddiyey waxay u baahan yihiin in istaandarada heerka fasalku la qiimeeyo laakiin u oggolaato goboladu inay kordhiyaan galaangal yeeladka ardayda naafada ah iyo inay la dejiyo istaandaro kasbasho oo la geddiyey. Galaangal u yeelashada waxa lagu xalliyaa MCA-ga la Geddiyey iyadoo la yaraynayo kakanaanta iyo tirada

curisyada ardaydu ay tahay inay akhriyaan iyo soo hordhigga su'aalo imtixaano yar. Sidoo kale, waxyaalaha ku dheggan curiska, ashyaa leh saddex jawaab ikhtiyaar ah halkii afarta iyo tilmaamo sahlid luuqadda ayaa si taxadar leh loo adeegsadaa. Istaandarka kasbashada la geddiyey ee ardaydan naafada ah waxay u oggolaanaysaa ardaydu inay ku fiicnaadaan iyagoo muujinaya tiro la yareeyey ee KSPs oo leh heerar hoose ee kakanaanta garasho.

MTAS ALDs waxay kusalaysan yihiin Istaandarada 1 ilaa 4, kuwaasi oo si wayn loo yareeyey qota dheeridooda, baaxadda iyo kakanaanta. MDE waxay u tixraacdaa istaandaradan "istaandaro la fidiyey ahaan" sababtoo ah dhammaadka hoose ee qiyaasta waxqabadka laga filayo istaandaradan waxa loo fidiyey hoos si loogu daro xirfado aad u aasaasi ah ee kakanaanta garasho ee hoose. Shaqaalaha qiimaynta beddelka ah ee MDE waxay qoreen MTAS ALDs ugu dambayntii waxayna aad isugu halleeyeen nashqadda imtixaanka MTAS halka istaandarada la fidiyey lagu sharxo (Minnesota ma daabicin istaandarada tacliineed ee beddelka ah).

Gabagabaynta ALDs

ALDs waxa la soo hor dhigay guddida dejinta istaandarka Juun 2013 dokumenti siyaasad ahaan. Waa ku-talogalka gobolka in ardayda kasbada heer ku fiicnaasho ay muujin karaan aqoonta, xirfadaha iyo hababka lagu sharraxay ALDs-kan, ujeedada dejinta istaandarkuna may ahayn in dib loo eego dokumentigan laakiin waxay ahayd in loo adeegsado go'aaminta sargoynta buundooyinka. Guddida dejinta istaandarka waxa looga baahnaa inay abuuraan bardhammaad muujiyayaal "si dirqi ah ku buuxiyey" oo ka socda ALDs-kan iyo inay ku adeegsadaan waxqabadka ay arkeen inay muujiyeen agabka dejinta istaandarka. Guddida dejinta istaandarku wax dhib ah kama ay sheegin sharraxaadaha waxqabadka heerka kasta oo ALDs ah. ALDs ayaa kadib la gabagabeeyey markaii Madaxa Sare ee Waxbarasho ansixiyey sargoynta buundada ay ku taliyeen guddida dejinta istaandarka.

Hagaha Fahamka Muujiyaha Heerka Kasbashada Akhriska MCA-III

Muujiyayaasha Heerka Kasbashada (ALDs) ku qoran mid kasta oo kamid ah afarta heerarka kasbasho ee hoose waxay sharxaysaa aqoonta iyo xirfadaha lagu qiimeeyey Qiimaynta Baaxadda leh ee Minnesota ee Akhriska, Silsilada III (MCA-III).

Hadalo Caawimo leh Fahamka Qaabdhismeedka Muujiyayaasha Heerka Kasbashada (ADLs(iyo Waxa ay u Taagan Yihiin

ALD: Mid kamid ah afar heer oo cayiman ee waxqabad oo ay ku lammaan yihiin xirfad akhris oo gaar ah. ALD waxa loo kala saari karaa hal kamid ah afarta heer kasbasho: Aan Buuxin Istaandarada, Qayb ahaan Buuxiyey Istaandarada, Buuxiyey Istaandarada iyo Barodhaafiyey Istaandarada. Eeg sharraxaadda ku qoran hoosta ciwaanka heer kasbasho kasta.

Qaybta: Tani waa meesha tusmada ee qiimaynta. Cinwaanka qaybta ee Akhriska MCA-III waa **Akhriska**.

Qayb-hoosaad: Istaandarada Akhriska waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo la dhaho qayb-hoosaad. Labada qayb-hoosaad ee lagu qiimeeyo Akhriska MCA-III waa Suugaanta iyo Qoraalka Wargalineed. Sharraxaadda hoose ee noocyada qoraalka sida badan hoos yimaada labadan qayb-hoosaad waxa laga soo qaatay *Nashaqadda Imtixaanka Akhriska ee MCA-III, Fasalada 3-8 iyo 10 iyo MCA-ga la Geddiyey, Fasalada 5-8,* bogagga 3-4 iyo 15. Dokumentigan waxa laga heli karaa websaytka Waaxda Waxbarashada Minnesota. Ka eeg MCA-III, Fasalada 3-8 iyo 10 iyo MCA-ga la Geddiyey Fasalada 5-8, 10 Nashqadda Imtixaanka DRAFT: Akhriska (istaandarada 2010) (View the MCA-III Grades 3–8, 10 and MCA-Modified Grades 5–8, 10 DRAFT Test Specifications: Reading (2010 standards)).

1. Suugaanta: Curisyada leh ashyaada waafaqsan qaybhoosaadka Suugaanta waxa kamid noqon kara, laakiin aan ku ekayn, noocyada qoraalka soo socda: sheekooyinka, riwaayadaha, iyo gabayada.
2. Qoraalka Wargalineed: Curisyada leh ashyaada waafaqsan qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed waxa kamid noqon kara, laakiin aan ku ekayn, noocyada qoraalka soo socda: suugaanta dhabta iyo taariikhda, sayniska, iyo qoraalada farsamo.

Istaanadar: Istaandaradu waxay bixiyaan sharraxaadda guud ee aqoonta iyo xirfadaha akhriska kuwaasi oo ay tahay ardayda oo dhan inay buuxiyaan si ay u buuxiyaan shuruudaha gobolka. Toddoba kamid ah 10 istaandarada akhriska waxa lagu qiimeeyaa Akhriska MCA-III.

Qaybta Xirfadda: Tani waa qaybqaybin guud ee istaandarada la xidhiidha akhriska sida ku taal *Istaandarada Tacliineed ee Minnesota K-12*, *Farshaxanada Luuqadda Ingiriisida, 2010*. Ka eeg Istaandarada Tacliineed ee Minnesota K-12 ee Farshaxanada Luuqadda Ingiriisida (2010) websaytka Waaxda Waxbarashada Minnesota (View the Minnesota K-12 Academic Standards in English Language Arts (2010) on the Minnesota Department of Education website).

Saddex kamid ah afarta qayb xirfadeed waxa lagu qiimeeyaa Akhriska MCA-III. Saddexdan qaybood waa kuwa hoos ku qoran:

1. Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3: tus., caddaynta qoraalka, qaadashda go'aano, fikradda muhiimka ah, mawduuca, sifooyinka qoraalka, iyo sifooyinka ashkhaasta, dhacdooyinka, iyo fikradaha)
2. Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6: tus., erayada, afmaldah, foormaatka qoraalada, ujeedada qoraaga, hababka iyo qaabka qoraaga)
3. Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya: tus., sumcadda qoraaga iyo hababka soo bandhigga caddaynta)

ALDs ku qoran mid kasta oo kamid ah afarta heerar kasbasho waxay ku dabbaqmi karaan hal ama kabadan istaandarada qayb xirfadeed kasta.

Fiiro gaar ah oo la xidhiidha nidaamka tixista ALDs: ALD kuma qorna heer kasbasho oo sare fasalka dhexdiisa haddii sifooyinka xirfadaha ka muuqda ALD ayna iska beddel hal heer kasbasho iskuna beddelin heerka kasbasho ee ka sarreeya ee xiga. Sidoo kale, ku celinta ALDs ee heer kasbasho oo isku mid ah waxa dhici karta inay dhacaan fasalada oo dhan ku celinta ALDs waa natiijada kakanaan qoraal oo aad ah gudaha iyo dhammaan fasalada mana soojeedinayso dayacaad filashooyinka waxqabad.

FASALKA 3 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III

Aan Buuxin Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si aan habboonayn iyo saxsanaanta ugu yar.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

- Xasuusasho tafaasiisha qoraalka
- Samayna saadaalino sahlan oo kusalaysan qoraal toos ah
- Aqoonsiga xaqiiq cad iyo fikrad ee qoraal toos ah
- Samaynta isbarbardhig guud oo kusalaysan qoraal toos ah
- Sheegista fikradda guud iyo caloosha farriinta
- Aqoonsia isku xigista aasaasiga ah ee dhacdooyinka

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

- Aqoonsiga afmaldaha sahlan
- Sheegista sharraxa erayada ee cad si uu u fahmo macnayaasha erayga
- Aqoonsiga halkudhegga iyo oraahyada
- Aqoonsiga sifooyinka, foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada aasaasiga ah ee qoraalka (tus., tixista) iyo raadkooda macnaha ay ku leeyihiin
- Sheegista ujeedada cad ee qoraaga ee qoraal toos ah

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

- Aqoonsiga caddaynta tooska ah ee qoraal (tus., xidhiidhada suurogalka ah ee u dhexeeya weedhaha iyo baaragaraafyada)

Qayb ahaan Buuxiyey Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboonaan iyo saxsanaan liidata.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

- Isticmaalka caddayn qoraal toos ah si uu u sameeyo gunaanad macquul ah
- Aqoonsiga tafaasiilka muhiimka ee la xidhiidha qoraalka
- Samaynta saadaalino kusalaysan qoraal
- Ku tixista sawir dhacdeed aasaasi ah, dhacdooyin dhab ah, iyo tallaabooyinka hab
- Sheegista sababta iyo saamaynta
- Aqoonsiga xaqiiqda iyo fikradda
- Isticmaalka caddaynta qoraal si ay macno u samayso
- Samaynta isbarbardhig sahlan oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
- Sheegista fikradda guud iyo mawduuca qayb kamid ah qoraal toos ah ama dhammaan qoraal toos ah ka yimi
- Aqoonsiga qaybaha suugaanta ee cad (tus., sawirka, sifaynta, goobta, iyo mawduuca
- Aqoonsiga tibaaxaha suugaanta (tus., sheekada, mooraalka)

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

- Aqoonsiga aaladaha suugaanta ee aasaasiga ah (tus., puns-ka cad, habdhaca sadarada suugaan sahlan)
- Aqoonsiga sarbeebta aasaasiga ah
- Isticmaalka sharraxa erayada si uu u fahmo macnaha erayga
- Qeexista eray-bixinta farsameed ee meelaha tusmada qoraalka

Aqoonsiga erayada xidhiidhinta istaandarka (tus., laakiin, haddana, wali)
Isticmaalka qaabdhismeedka erayga si uu u dhiso macne (horgalayaal iyo xididdo)
Aqoonsiga sifooyinka, foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada aasaasiga ah ee qoraalka (tus., sharraxa guud) iyo raadka ay ku leeyihiin macnaha
Sheegista ujeedada aasaasiga ah ee qoraaga qoraalka dhexdiisa

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Go'aan ka qaadashada macquulnimada qoraaga ee qoraal toos ah:

- Sheegista muranka cad ee qoraalka dhexdiisa
- Aqoonsiga caddayn macquul ah (tus., sharraxaad suurogal ah)
- Aqoonsiga sida qoraagu u soo bandhigo xaqiiqda/fikradda

Buuxiyey Istaandarka

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboon oo sax ah.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Isticmaalka caddaynta qoraal aan caddayn si uu u sheego si sax ah sameeyana gunaanad macquul ah
Aqoonsiga tafaasiisha ku tacaluqda kuwaasi oo taageera gunaanadyada qoraalka ka yimi
Samaynta fikradaha guud iyo saadaalinaha
Ku tixista sawir dhacdeed aasaasi ah, dhacdooyin dhab ah, iyo tallaabooyinka hab
Isticmaalka caddaynta qoraalka si ay u fahmaan xidhiidhada sababta/saamaynta
Samaynta go'aano kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Kala soocista xaqiiqda iyo fikradda qoraal toos ah
Isticmaalka caddaynta qoraal si uu ugu cudurdaaro tarjumaadaha macnaha
Isbarbardhigga iyo iskahorkeenka kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Guudmarka qayb kamid ah qoraal ama qoraalka gabi ahaan:

- fikradda guud
- farriinta dhexe
- tafaasiisha taageerista
- sawirka
- mawduuc
- dulucda hadalka
- cinwaanka
- is-shabbaha iyo faraqa afkaarta iyo dhacdooyinka

Kala soocista qaybaha suugaanta (tus., sawir, kala soocista, dejinta, dulucda hadalka)
Kala saarista hababka kala soocista (tus., wada sheekaysiga, muuqaalka, habdhaqanka)
Qeexista macnaha tibaaxyada suugaaned (tus., sheekooyinka, mooraalka)
Isbarbardhigga iyo iskahorkeenka soojeedimaha qaybaha suugaaneed

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Aqoonsiga aaladaha suugaaneed (tus., puns-ka, habdhaca dhammaadka)
Aqoonsiga sarbeebta
Isku xidhka erayga iyo macnihiisa
Isticmaalka sababaynta iyo caddaynta si uu u fahmo macnayaasha ergayga
Qayb qaybinta eraybixinta farsameed qoraalka meesha tusmada
Aqoonsiga erayada iyo oraahyada xidhiidhinta (tus., tusaale ahaan, marka hore, marka labaad, marka saddexaad)
Isticmaalka taariikhda erayga iyo qaabdhismeedkiisa si uu u dhiso macnaha eray ama oraah
Falanqaynta sifooyinka, qaabka/foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada qoraal kakan (tus., xidhiidhsanaanta) iyo raadka ay ku leeyihiin macnaha

Aqoonsiga sida qaybaha qoraal ula xidhiidhaan ka guud
Aqoonsiga istimaalka qoraaga ee fikradda (aragtida gaar ahaaneed) iyo hab qoraaleedka (dabeecadda xagga waxa uu qoray)
Tarjumaada ujeedooyinka qoraaga ee gudaha iyo dibadda qoraalka
Aqoonsiga xaaladda (jawiga qoraalka)
Aqoonsiga qaabka (farsamooyinka qoraaga iyo qaabilaada macnaha—tus., doorashada erayga, qaabdhismeedka weedha, isticmaalka aaladaha suugaanta, codka)

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Falanqaybta macquulnimada qoraaga ee kusalaysan ilaha uu isticmaalay
Aqoonsiga hababka dooda (tus., isku ekaanshaha, tafaasiisha iyo tusaalayaasha)
Aqoonsiga saxsanaanta sababaynta
Aqoonsiga la xihdiidhista iyo ku fillaanshaha caddaynta
Aqoonsiga fikradda khaldan ee cad ee suurogaleed (tus., wax iska aaminid)
Aqoonsiga sida macluumaad macquul ah loogu soo bandhigo qoraal (tus., waraysiyada khabiirada, cilmi-baadhista maanta)
Aqoonsiga eexda cad ee qoraaga

Baradhaafiyey Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboonaansho iyo saxsanaansho heersare ah.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Ka samaynta gunaanad macquul ah qoraalka
Aqoonsiga tafaasiil gaar ah si uu u taageero gunaanadyada qoraalka ka yimi
Isticmaalka fikradaha guud si uu u sameeyo saadaalino
Isticmaalka caddaynta qoraalka si uu u falanqeeyo xidhiidhada sababta/saamaynta
Samaynta go'aano kakan oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Kala soocista xaqiiqda iyo fikradda kujira qoraalo aan toos ahayn oo kala duwan
Isbarbardhiga oo iskahorkeena sifooyinka qoraalka si qoto dheer oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Guudmarka uu ka sameeyo qayb qoraal kamid ah, qoraal dhan, iyo qoraalada oo dhan:

- fikradda guud
- farriinta dhexe
- tafaasiisha taageerista
- sawirka
- mawduuc
- dulucda
- cinwaanka
- is-shabbaha iyo faraqa afkaarta iyo dhacdooyinka

Falanqaybta qaybaha suugaanta (tus., sawirka, kala soocista, dejinta, dulucda)
Falanqaynta qaababka kala soocista

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Falanqaynta aaladaha suugaanta (tus., waxtarka puns, adkaanshaha nidaamka habdhaca)
Aqoonsiga sida erayadu u saameeyaan macnaha
Falanqaynta ujeedada eraybixinta farsameed qoraalada meelaha tusmada
Falanqaynta isticmaalka aaladaha xidhiidhinta (tus., si cad, shaki la'aan, hubaashii)
Qiimaynta sifooyinka, qaabka, iyo shaqada qaabdhismeedyada kakan ee qoraal (tus., qeexdinta) iyo raadkooda macnaha
Falanqaynta sida qaybaha qoraal ula xidhiidho gabi ahaantiisa

Falanqaynta sida farriinta qoraagu ay u qaabaysay aragtida iyo habka qoraalku
Aqoonsiga sida doorashooyinka qoraagu u raadayso qaabka (tus., raadka habka qoraalka, mala-awaalka, iwm.)
Falanqaynta ujeedooyinka qoraaga gudaha iyo dibadda qoraalka

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Qaadashada go'aano kusaabsan macquulnimada qoraaga ee kusalaysan qoraal kakan:

- adeegsiga fikradaha aasaasiga ah ee dooda (sooyaalka, wada xaajoodka, iyo caddaynta dooda)
- falanqaynta saxsanaanta sababaynta
- aqoonsiga fikradda khaldan ee cad ee suurogaleed (tus., isku qabasho degdeg ah)
- falanqaynta ku tacaluqa iyo ku fillaanshaha caddaynta
- falanqaynta eexda qoraaga

FASALKA 4 - MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III

Aan Buuxin Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si aan habboonayn iyo saxsanaanta ugu yar.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

- Xasuusasho tafaasiisha qoraalka
- Samayna saadaalino sahlan oo kusalaysan qoraal toos ah
- Aqoonsiga sabab ama saamayn
- Aqoonsiga xaqiiq cad iyo fikrad ee qoraal toos ah
- Samaynta isbarbardhig guud oo kusalaysan qoraal toos ah
- Sheegista fikradda guud iyo caloosha farriinta
- Aqoonsia isku xigista aasaasiga ah ee dhacdooyinka

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

- Aqoonsiga afmaldaha sahlan
- Sheegista sharraxa erayada ee cad si uu u fahmo macnayaasha erayga
- Aqoonsiga halkudhegga iyo oraahyada
- Aqoonsiga sifooyinka, foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada aasaasiga ah ee qoraalka (tus., tixista) iyo raadkooda macnaha ay ku leeyihiin
- Sheegista ujeedada cad ee qoraaga ee qoraal toos ah

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

- Aqoonsiga caddaynta tooska ah ee qoraal (tus., xidhiidhada suurogalka ah ee u dhexeeya weedhaha iyo baaragaraafyada)

Qayb ahaan Buuxiyey Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboonaan iyo saxsanaan liidata.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

- Isticmaalka caddayn qoraal toos ah si uu u sameeyo gunaanad macquul ah
- Aqoonsiga tafaasiilka muhiimka ee la xidhiidha qoraalka
- Samaynta saadaalino kusalaysan qoraal
- Ku tixista sawir dhacdeed aasaasi ah, dhacdooyin dhab ah iyo tallaabooyinka hab
- Sheegista sababta ama saamaynta
- Aqoonsiga xaqiiqda iyo fikradda
- Isticmaalka caddaynta qoraal si ay macno u samayso
- Samaynta isbarbardhig sahlan oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
- Sheegista fikradda guud iyo mawduuca qayb kamid ah qoraal toos ah ama dhammaan qoraal toos ah ka yimi
- Aqoonsiga qaybaha suugaanta ee cad (tus., sawirka, khilaafka, kala soocista, dejinta, mawduuca
- Aqoonsiga tibaaxaha suugaanta (tus., geesi, dhiblow)

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

- Aqoonsiga aaladaha suugaanta ee aasaasiga ah (tus., ekeeyaha)
- Aqoonsiga sarbeebta aasaasiga ah
- Isticmaalka sharraxa erayada si uu u fahmo macnaha erayga
- Qeexista eray-bixinta farsameed ee meelaha tusmada qoraalka

Aqoonsiga erayada xidhiidhinta istaandarka (tus., ka gadaal, ugu dambayn, hase yeeshee)
Isticmaalka qaabdhismeedka erayga si uu u dhiso macne (horgalayaal iyo xididdo)
Aqoonsiga sifooyinka, foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada aasaasiga ah ee qoraalka (tus., sharraxa guud) iyo raadka ay ku leeyihiin macnaha
Sheegista ujeedada aasaasiga ah ee qoraaga qoraalka dhexdiisa

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Go'aan ka qaadashada macquulnimada qoraaga ee qoraal toos ah:

- Sheegista muranka cad ee qoraalka dhexdiisa
- Aqoonsiga caddayn macquul ah (tus., sharraxaad suurogal ah)
- Aqoonsiga sida qoraagu u soo bandhigo xaqiiqda/fikradda

Buuxiyey Istaandarka

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboon oo sax ah.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Isticmaalka caddaynta qoraal aan caddayn si uu u sheego si sax ah sameeyana gunaanad macquul ah
Aqoonsiga tafaasiisha ku tacaluqda kuwaasi oo taageera gunaanadyada qoraalka ka yimi
Samaynta fikradaha guud iyo saadaalinaha
Ku tixista sawir dhacdeed aasaasi ah, dhacdooyin dhab ah, iyo tallaabooyinka hab
Isticmaalka caddaynta qoraalka si ay u fahmaan xidhiidhada sababta/saamaynta
Samaynta go'aano kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Kala soocista xaqiiqda iyo fikradda qoraal toos ah
Isticmaalka caddaynta qoraal si uu ugu cudurdaaro tarjumaadaha macnaha
Isbarbardhigga iyo iskahorkeenka kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Guudmarka qayb kamid ah qoraal ama qoraalka gabi ahaan:

- fikradda guud
- farriinta dhexe
- tafaasiisha taageerista
- sawirka
- mawduuc
- dulucda hadalka
- cinwaanka
- is-shabbaha iyo faraqa afkaarta iyo dhacdooyinka

Kala soocista qaybaha suugaanta (tus., sawir, kala soocista, dejinta, dulucda hadalka)
Kala saarista hababka kala soocista (tus., wada sheekaysiga, muuqaalka, habdhaqanka)
Qeexista macnaha tibaaxyada suugaaneed (tus., geesi, dhiblow)
Isbarbardhigga iyo iskahorkeenka soojeedimaha qaybaha suugaaneed

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Aqoonsiga aaladaha suugaaneed (tus., dhammaadka habdhaca)
Aqoonsiga sarbeebta
Isku xidhka erayga iyo macnihiisa
Isticmaalka sababaynta iyo caddaynta si uu u fahmo macnayaasha ergayga
Qayb qaybinta eraybixinta farsameed qoraalka meesha tusmada
Aqoonsiga erayada iyo oraahyada xidhiidhinta (tus., tusaale ahaan, markaas, ugu dambayn, dhinaca kale)
Isticmaalka taariikhda erayga iyo qaabdhismeedkiisa si uu u dhiso macnaha eray ama oraah
Falanqaynta sifooyinka, qaabka/foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada qoraal kakan (tus., xidhiidhsanaanta) iyo raadka ay ku leeyihiin macnaha

Aqoonsiga isticmaalka qoraaga ee fikradda (aragtida gaar ahaaneed) iyo hab qoraaleedka (dabeecadda xagga waxa uu qoray)
Tarjumaada ujeedooyinka qoraaga ee gudaha iyo dibadda qoraalka
Aqoonsiga xaaladda (jawiga qoraalka)
Aqoonsiga qaabka (farsamooyinka qoraaga iyo qaabilaada macnaha—tus., doorashada erayga, qaabdhismeedka weedha, isticmaalka aaladaha suugaanta, codka)

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Falanqaybta macquulnimada qoraaga ee kusalaysan ilaha uu isticmaalay
Aqoonsiga hababka dooda (tus., isku ekaanshaha, tafaasiisha iyo tusaalayaasha)
Aqoonsiga saxsanaanta sababaynta
Aqoonsiga la xihdiidhista iyo ku fillaanshaha caddaynta
Aqoonsiga fikradda khaldan ee cad ee suurogaleed (tus., wax iska aaminid)
Aqoonsiga sida macluumaad macquul ah loogu soo bandhigo qoraal (tus., waraysiyada khabiirada, cilmi-baadhista maanta)
Aqoonsiga eexda cad ee qoraaga

Baradhaafiyey Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboonaansho iyo saxsanaansho heersare ah.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Ka samaynta gunaanad macquul ah qoraalka
Aqoonsiga tafaasiil gaar ah si uu u taageero gunaanadyada qoraalka ka yimi
Isticmaalka fikradaha guud si uu u sameeyo saadaalino kakan
Isticmaalka caddaynta qoraalka si uu u falanqeeyo xidhiidhada sababta/saamaynta
Samaynta go'aano kakan oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Kala soocista xaqiiqda iyo fikradda kujira qoraalo aan toos ahayn oo kala duwan
Isbarbardhiga oo iskahorkeena sifooyinka qoraalka si qoto dheer oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Guudmarka uu ka sameeyo qayb qoraal kamid ah, qoraal dhan, iyo qoraalada oo dhan:

- fikradda guud
- farriinta dhexe
- tafaasiisha taageerista
- sawirka
- mawduuc
- dulucda
- cinwaanka
- is-shabbaha iyo faraqa afkaarta iyo dhacdooyinka

Falanqaynta qaybaha suugaanta (tus., sawirka, kala soocista, dejinta, dulucda)
Falanqaynta qaababka kala soocista

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Falanqaynta aaladaha suugaanta (tus., saadaalin)
Falanqaynta isticmaalka sarbeebaha
Aqoonsiga sida erayadu u saameeyaan macnaha
Falanqaynta ujeedada eraybixinta farsameed qoraalada meelaha tusmada
Falanqaynta isticmaalka aaladaha xidhiidhinta (tus., si cad, shaki la'aan, hubaashii)
Qiimaynta sifooyinka, qaabka, iyo shaqada qaabdhismeedyada kakan ee qoraal (tus., qeexdinta) iyo raadkooda macnaha
Falanqaynta sida qaybaha qoraal ula xidhiidho gabi ahaantiisa
Falanqaynta sida farriinta qoraagu ay u qaabaysay aragtida iyo habka qoraalka

Aqoonsiga sida doorashooyinka qoraagu u raadayso qaabka (tus., raadka habka qoraalka, mala-awaalka, iwm.)
Falanqaynta ujeedooyinka qoraaga gudaha iyo dibadda qoraalka
Aqoonsiga falgakla u dhexeeya xaaladda iyo qaabka

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Qaadashada go'aano kusaabsan macquulnimada qoraaga ee kusalaysan qoraal kakan:

- adeegsiga fikradaha aasaasiga ah ee dooda (sooyaalka, wada xaajoodka, iyo caddaynta dooda)
- falanqaynta saxsanaanta sababaynta
- aqoonsiga fikradda khaldan ee cad ee suurogaleed (tus., isku qabasho degdeg ah)
- falanqaynta ku tacaluqa iyo ku fillaanshaha caddaynta
- falanqaynta eexda qoraaga

FASALKA 5 – MUUJIYAYAASHA HEERKA KASBASHO EE AKHRISKA MCA-III

Aan Buuxin Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si aan habboonayn iyo saxsanaanta ugu yar.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Xasuusasho tafaasiisha qoraalka
Samaynta saadaalino sahlan oo kusalaysan qoraal toos ah
Aqoonsiga sabab ama saamayn
Aqoonsiga xaqiiq cad iyo fikrad ee qoraal toos ah
Samaynta isbarbardhig guud oo kusalaysan qoraal toos ah
Sheegista fikradda guud, caloosha farriinta, iyo dulucda
Aqoonsiga isku xigista aasaasiga ah ee dhacdooyinka

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Aqoonsiga afmaldaha sahlan
Sheegista sharraxa erayada ee cad si uu u fahmo macnayaasha erayga
Aqoonsiga halkudhegga iyo oraahyada
Aqoonsiga sifooyinka, foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada aasaasiga ah ee qoraalka (tus., tixista) iyo raadkooda macnaha ay ku leeyihiin
Sheegista ujeedada cad ee qoraaga ee qoraal toos ah

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Aqoonsiga caddaynta tooska ah ee qoraal (tus., xidhiidhada suurogalka ah ee u dhexeeya weedhaha iyo baaragaraafyada)

Qayb ahaan Buuxiyey Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboonaan iyo saxsanaan liidata.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Isticmaalka caddayn qoraal toos ah si uu u sameeyo gunaanad macquul ah
Aqoonsiga tafaasiilka muhiimka ee la xidhiidha qoraalka
Samaynta saadaalino kusalaysan qoraal
Ku tixista sawir dhacdeed aasaasi ah, dhacdooyin dhab ah iyo tallaabooyinka hab
Sheegista sababta ama saamaynta
Aqoonsiga xaqiiqda iyo fikradda
Isticmaalka caddaynta qoraal si ay macno u samayso
Samaynta isbarbardhig sahlan oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Sheegista fikradda guud iyo mawduuca qayb kamid ah qoraal toos ah ama dhammaan qoraal toos ah ka yimi
Aqoonsiga qaybaha suugaanta ee cad (tus., sawirka, kala soocista, dejinta, mawduuca)
Aqoonsiga kala soocista cad
Aqoonsiga tibaaxaha suugaanta (tus., hormood, mucaarad)

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Aqoonsiga aaladaha suugaanta (tus., haybarbool)
Aqoonsiga sarbeebta aasaasiga ah
Isticmaalka sharraxa erayada si uu u fahmo macnaha erayga

Qeexista eray-bixinta farsameed ee meelaha tusmada qoraalka
Aqoonsiga erayada xidhiidhinta istaandarka (tus., si lamid ah, sidoo kale, ka gadaal)
Isticmaalka qaabdhismeedka erayga si uu u dhiso macne (horgalayaal iyo xididdo)
Aqoonsiga sifooyinka, foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada aasaasiga ah ee qoraalka (tus., sharraxa guud) iyo raadka ay ku leeyihiin macnaha
Sheegista ujeedada aasaasiga ah ee qoraaga qoraalka dhexdiisa

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Go'aan ka qaadashada macquulnimada qoraaga ee qoraal toos ah:

- Sheegista muranka cad ee qoraalka dhexdiisa
- Aqoonsiga caddayn macquul ah (tus., sharraxaad suurogal ah)
- Aqoonsiga sida qoraagu u soo bandhigo xaqiiqda/fikradda

Buuxiyey Istaandarka

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboon oo sax ah.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Isticmaalka caddaynta qoraal aan caddayn si uu u sheego si sax ah sameeyana gunaanad macquul ah
Aqoonsiga tafaasiisha ku tacaluqda kuwaasi oo taageera gunaanadyada qoraalka ka yimi
Isticmaalka fikradaha guud iyo samaynta saadaalinaha
Ku tixista sawir dhacdeed aasaasi ah, dhacdooyin dhab ah, iyo tallaabooyinka hab
Isticmaalka caddaynta qoraalka si ay u fahmaan xidhiidhada sababta/saamaynta
Samaynta go'aano kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Kala soocista xaqiiqda iyo fikradda qoraal toos ah
Isticmaalka caddaynta qoraal si uu ugu cudurdaaro tarjumaadaha macnaha
Isbarbardhigga iyo iskahorkeenka kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Guudmarka qayb kamid ah qoraal ama qoraalka gabi ahaan:

- caddaynta qoraal muhiim ah (toos ah ama aan toos ahayn)
- fikradda guud
- farriinta dhexe
- tafaasiisha taageerista
- sawirka
- mawduuc
- dulucda hadalka
- cinwaanka
- is-shabbaha iyo faraqa afkaarta iyo dhacdooyinka

Kala soocista qaybaha suugaanta (tus., sawir, kala soocista, dejinta, dulucda)
Kala saarista hababka kala soocista (tus., wada sheekaysiga, muuqaalka, habdhaqanka)
Qeexista macnaha tibaaxyada suugaaneed (tus., hormood, mucaarad)
Isbarbardhigga iyo iskahorkeenka soojeedimaha qaybaha suugaaneed

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Aqoonsiga aaladaha suugaaneed (tus., haybarabool)
Aqoonsiga sarbeebta
Isku xidhka erayga iyo macnihiisa
Isticmaalka sababaynta iyo caddaynta si uu u fahmo macnayaasha ergayga
Qayb qaybinta eraybixinta farsameed qoraalka meesha tusmada
Aqoonsiga erayada iyo oraahyada xidhiidhinta (tus., isku mar dhaca, isla markas, isla wakhtigaas)
Isticmaalka taariikhda erayga iyo qaabdhismeedkiisa si uu u dhiso macnaha eray ama oraah

Falanqaynta sifooyinka, qaabka/foormaatka, iyo shaqada qaabdhismeedyada qoraal kakan (tus., xidhiidhsanaanta) iyo raadka ay ku leeyihiin macnaha
Aqoonsiga isticmaalka qoraaga ee fikradda (aragtida gaar ahaaneed) iyo hab qoraaleedka (dabeecadda xagga waxa uu qoray)
Tarjumaada ujeedooyinka qoraaga ee gudaha iyo dibadda qoraalka
Aqoonsiga xaaladda (jawiga qoraalka)
Aqoonsiga qaabka (farsamooyinka qoraaga iyo qaabilaada macnaha—tus., doorashada erayga, qaabdhismeedka weedha, isticmaalka aaladaha suugaanta, codka)

Midaynta Aqoonta iyo Fikradaha (Istaandar 8, qaybhoosaadka Qoraalka Wargalineed oo kaliya)

Falanqaybta macquulnimada qoraaga ee kusalaysan ilaha uu isticmaalay
Aqoonsiga hababka dooda (tus., isku ekaanshaha, tafaasiisha iyo tusaalayaasha)
Aqoonsiga saxsanaanta sababaynta
Aqoonsiga la xidhiidhista iyo ku fillaanshaha caddaynta
Aqoonsiga fikradda khaldan ee cad ee suurogaleed (tus., wax iska aaminid)
Aqoonsiga sida macluumaad macquul ah loogu soo bandhigo qoraal (tus., waraysiyada khabiirada, cilmi-baadhista socota)
Aqoonsiga eexda cad ee qoraaga

Baradhaafiyey Istaandarada

Marka ay la falgalayaan suugaanta iyo qoraalka wargalineed, ardayda heerkan kasbasho waxay u muujiyaan xirfadaha soo socda si habboonaansho iyo saxsanaansho heersare ah.

Aasaaska iyo Tafaasiisha (Istaandarada 1, 2, 3)

Ka samaynta gunaanad macquul ah qoraalka
Falanqaynta tafaasiil gaar ah si uu u taageero gunaanadyada qoraalka ka yimi
Isticmaalka fikradaha guud iyo samaynta saadaalino kakan
Isticmaalka caddaynta qoraalka si uu u falanqeeyo una abuuro xidhiidhada sababta/saamaynta
Samaynta go'aano kakan oo kusalaysan qoraal aan toos ahayn
Kala soocista xaqiiqda iyo fikradda kujira qoraalo aan toos ahayn oo kala duwan
Isbarbardhiga oo iskahorkeenka dadka iyo fikradaha kusalaysan qoraan aan toos ahayn
Guudmarka iyo/ama dib u qorista uu ka sameeyo qayb qoraal kamid ah, qoraal dhan, iyo qoraalada oo dhan:

- caddaynta qoraal muhiim ah (toos ah ama aan toos ahayn)
- fikradda guud
- farriinta dhexe
- tafaasiisha taageerista
- sawirka
- mawduuc
- dulucda
- cinwaanka
- is-shabbaha iyo faraqa afkaarta iyo dhacdooyinka

Falanqaynta qaybaha suugaanta (tus., sawirka, kala soocista, dejinta, dulucda)
Falanqaynta qaababka kala soocista

Farshaxanka iyo Qaabdhismeedka (Istaandarada 4, 5, 6)

Falanqaynta aaladaha suugaanta (tus., waxtarka haybarabool)
Falanqaynta isticmaalka sarbeebaha
Aqoonsiga sida erayadu u saameeyaan macnaha
Falanqaynta ujeedada eraybixinta farsameed qoraalada meelaha tusmada

Falanqaynta isticmaalka aaladaha xidhiidhinta (tus., shaki la'aan, sababtaas oo kale, si dhammaystiran)
Qiimaynta sifooyinka, qaabka, iyo shaqada qaabdhismeedyada kakan ee qoraal (tus., qeexdinta) iyo raadkooda macnaha
Falanqaynta sida qaybaha qoraal ula xidhiidho gabi ahaantiisa
Falanqaynta sida farriinta qoraagu ay u qaabaysay aragtida iyo habka qoraalka
Aqoonsiga sida doorashooyinka qoraagu u raadayso qaabka (tus., raadka habka qoraalka, mala-awaalka, iwm.)
Falanqaynta ujeedooyinka qoraaga gudaha iyo dibadda qoraalka
Aqoonsiga falgalka u dhexeeya xaaladda iyo qaabka

